



RENTAL RESOURCE GUIDE

Shabakada Tallaabada ka Qeybgelinta Milkiilaha [Landlord Engagement Action Network]

BARNAAMIJ UU SOO
BANDHIGGAYO

H

DEGMADA (THE CITY OF COLUMBUS
MICHAEL B. COLEMAN, DUQA MAGAALADA

Homes
Iskaashiga Horumarrinta Jaanyada

LEAN

Landlord Engagement Action Network



www.WestSideLEAN.com

LEANKUSAABSAN WAXAANQABANNO

The Landlord Engagement Action

Network (LEAN) waa hal-abuur ay

ay bilaabeen Homes on the Hill

Iskaashiga Horumarrinta Jaaliyadda

Ee xiling gu'a ee 2014. LEAN waa shabakad milkiilayaal,

kireystayaal, iyo jiiraan oo ka kala yimid Columbus dhankeeda

Galbeed ku waas oo wadaaga dano ah in xaafaddaha lagu

dhiirigeliyo

in lagu faano iyo in la abuur jaaliyad degan guryo kiro oo

xamaasad leh.

WAXBAR



LEAN waxay milkiilayaasha iyo kiraystayaasha ay u fidisaa ilooyin waxbarasho oo qiimo leh iyadoo ay u mariso simaaro waxarasho oo ay qabato oo mowduucyada looga hadlo ay ka mid yihiin: sharciga milkiilaha/kireystaha, qaanuunka degmada iyo

KU XIRNAW

LEAN waxay dhiiri-gelinnaysaa habdhaqan kireyn oo damiir leh iyadoo lagu xirayo Westside ee milkiilayaasha iyo kiraystayaasha Ilaah bulshada iyo midba midka kale iyadoo loo marayo kullamada LEARNworking (shabakad). LEAN sidoo kale milkiilayaasha Westside waxay ku casuumaysaa in ururkeena ay ku soo biiraan iyada oo ay ku yaboohaya maareeynta guriga oo ay mas'uuliyad ku jirto. Xubnayaasheena waxaan ku soo dhejinnaa boggeena internetke si markaa dadka doonaya in ay guryo kiraystaan ay u arkaan xubnaha LEAN oo ballan qaadka galay.

XALLIN

LEAN waxay fududeysaa xallinta qilaafaadka ee u dhaxeeya kiraystayaasha iyo milkiilayaasha iyadoo weheshanaysa Greater Hilltop Area Shalom Zone waa adeegyada dhexdhexaadin oo bilaash ah. Kooxda dhexdhexaadinta Hilltop Shalom Zone waxaa ku jira in ka badan 30 dhexdhexaadiyayaal oo iskaa-wax-u-qabsato ah oo tabbar u leh, qaarkood waxay ku hadlaan luqadda Ingiriisika iyo luqadda Isbaanishka.

SIDALOOGUSOOBIRO

Ma danaynaysaa in Shabakadeena aad xubin ka noqoto? Si LEAN aad ugu soo biirto waa in Westside Columbus aad guri ku leedahay. Ma jiro lacag ama ujro ka xubin ka ahaansho, waxa kaliya lagaaga baahan yahay oo kaliya in aad qaado mas'uuliyad ballan qaad oo ah in aad jeceshahay in gacan aad ka geysato wanaajinta jaaliyadda kiraystayaasha. Ku biirista aad LEAN ku biirayso, waxaad heli doonta xogta shabakadeena ee milkiilayaasha iyo ilaha jaaliyadda. In milkiile aad tahay ayaa waxaan ku qoraynaa boggeena internetka ee LEAN, oo la taliyayaasha guryaha la dego ee Homes on the Hill CDC ayaa ku soo aadin doona kiraystayaasha raadinnaya in guryahaaga ay kiraystaan. Si LEAN xubin aad uga noqoto, fadlan soo buuxi foormka Arjiga Xubin ka noqoshada ee la soo raaciyay bogga dambe ee buug yarahan oo u soo gudbi Homes on the Hill CDC.





BALLANQAADKALEAN

- Kiraystayaasha waxay u fidinnaysaa hoy ammaan ah, qalayl ah, nadiif ah, oo hufan.
- Sharciyan ka soo baxaya waajibaadyada milkiilenimada.
- Guryaha kirada ah qaab la oggolaan karo u soo bandhiggaya.
- Ka qaybqaadanaya adeegyada dhexdhexaadinta oo nabad ku jirto si qilaafaadka loo xalliyo.
- Oo aan qayb ka ahayn dhaqanka daroogada, dembiyada, ama rabshadaha.
- Guryaha kiradaha ka diiwaangeliyo Xisaab hubiyaha Deegaanka Franklin County.

Fiiri bogga ugu dambeeya ee dukumentigan oo ku soo celi Homes on the Hill CDC.

XOGTA SHARCIGA

Xuquuqaha & Mas'uuliyaddaha Milkiilaha

SIDA UU QABO XEERKA OHIO EE DIB-LOO HAGAAJIYEE EE 5321.04

Sharciga wuxuu noqon karaa mid jahwareeri keeni kara oo ay adag in la turjumo, taas ayaa keentay in LEAN ay meel isugu soo ururiyo sharaxaadda xuquuqaha iyo mas'uuliyaddaha milkiilaha iyo kiraystayaasha oo kooban. Tani waa xilalka sharciga ah ee saaran milkiilayaasha iyo kiraystayaasha, xitaa haddii aan lagu qorin heshiiska guriga. Xusuusnow in aad wada akhriso heshiiskaaga guriga oo wixii tallo ee dhanka sharciga ahna qareen aad kala talato. Waad awoodaa in aad akhrisato Xeerka Ohio ee Dib-loo hagaajiyey, kaa soo ay ku qoran yihiin xuquuqaha & mas'uuliyaddaha milkiilaha iyo kiraystayaasha oo kooban, qatka internetka waa <http://codes.ohio.gov/orc>. Qaybta quseeya milkiilayaasha/kiraystayaasha wuxuu hoos yimaadaa Cinwaanka 53 ee LIII ee Cutubka Hantida Guryaha 5321 ee Milkiilayaasha & Kiraystayaasha.

MASUULIYADAHADA MILKIILAHADA

- Raac xeerarka dhismaha, guryaha, iyo caafimaadka saameeya caafimaadka iyo ammaanka.
- Dayactirka guryaha si looga dhigo meel lagu noolaan karo.
- Dhammaan waxyaabaha guriga ku jira ay u noqdaan wax shaqeyda sida korontada, tubbooyinka, kululiska iyo qaac bixiyaha iyo dhammaan wixii qalab ee milkiilaha guriga uu soo dhigay.
- Guriga ku jira biyaha kuleylka iyo kululiska ku filan, inkastoo kiraystaha ay dhici karto in looga baahdo in adeegyadan ay iska bixiyaan.
- Jarantarada iyo mariinka guriga ahaadaan kuwa ammaan ah iyo nadiif ah.
- Qashinka gasac lagu rido la siiyo (kaliya dhismayaasha ka kooban ama qaybood ama in ka badan).
- Kireystayaasha in la siiyo ugu yaraan 24 saacaddood oo ogeysiis ah ka hor inta aan la galin gurigooda.
- Kiraystayaasha ka saaritaanka lagu bilaabo haddii ay jiraan sababo wanaagsan oo la aaminsan yahay in kiraystaha guriga dhexdiisa uu ku iibinnayo muqaadaraadka sharci darada ah.

XUQUUQDA MILKIILAHADA

- Guriga lacag lacag kasta lagu kireeyo iysan ka ahayn haddii heshiiska uu ku qoran yahay lacag go'an; waa lagu kordhin karaa marka ogeysiis ku filan la bixiyo (ugu yaraan 30 maalmood).
- Laga ijaaro qof kasta oo la rabo haddiiba sharciga takoorka lidka ku ah la dhowrayo, oo la dhidab tirayo shuruudaha iyo heshiiska liiska ku qoran haddiiba uusan ka hor imaanayn sharciga dowladda dhaxe ama kan gobolka (fiiri mas'uuliyaddaha milkiilaha).
- Kiraysataha laga saaro goorta lacagta kirada aan la bixin ama goorta heshiiska ijaarka la jebiyo. Kiraystayaashaada waa in ogeysiis qoraal ah aad siisaa in aad ka saarayso ka hor inta maxkamadda aadan u gudbin.
- Kiraystayaasha waa in si qoraal ah aad ku wargelisaa (30 maalmood gudahooda ka hor inta aadan ka saarin) haddii kiraystaha uu ku guul-darreysato inuu raaco waajibbaadka kiraystaha ee saamaynaysa caafimaadka ama amniga kiraystayaasha kale.
- Xaq guriga lagu geli karo oo lagu baaro, lagu dayactirro, wax laga hagaajiyo, sahay la keeno, ama guriga qof la tusin karo haddii ogeysiis ku filan la bixiyo (ugu yaraan 24 saacaddood) waa in la bixiyaa.
- Xuquuq ah in gurigaga lagugu soo celiyo isagoo xaalad wanaagsan ah isla sidii marka kiraysaha aad guriga kiraysay oo kale ah (aysan ka ahayn meelaha caadiga ah ee uu wax ka noqday mooyaane).



XOGTA SHARCIGA

Xuquuqaha & Mas'uuliyaddaha Kiraystaha

SIDA UU QABO XEERKA OHIO EE DIB-LOO HAGAAJIYEEY EE 5321.05



MAS'UULIYADDAHA KIREYSTAHA

- In bil kasta ijaarka la bixiyo Tan waa waxa ugu muhiimsan.
- Guriga waxyeello ha u geysan ama qof kale ha u oggolaan inuu waxyeello u geysto.
- Guriga ha ahaado meel ammaan ah oo nadiif ah.
- Addeec sharciyada gobolka iyo kan maxalliga ee guryaha, caafimaaadka iyo dhanka ammaanka.
- Si habboon qashinka u tuur.
- Alaabta guriga taal ee lagu kireeyey xafid oo ha noqdeen kuwa shaqeeya.
- Si habboon u isticmaal oo nadiifi dhammaan qalabka korontada iyo tubbooyinka guriga.
- Kiraysatayaasha kale ha qashqashaadin.
- Milkiilahaaga u oggolaan inuu guriga galo goorta ay codsi macquul ah aysa sameeyaan oo ay ku siiyaan ogeysiis 24 saacaddood ah.
- Waxyaabaha muqaadaraadka ah ee xigmaysan (sida daroogada) guriga ha u oggolaan.
- Mas'uul ahaw haddii guriga aad wax ka jebeiso, aysan ka ahayn waxyaabaha caadiga ee waxyeellada guriga.
- Ha u oggolaan kuwa dembiyada galmada la xiriira ku jira in guriga soo degaan haddii guriga uu iskuulkaa ama iskuulka barbaradka uu u jiro 1,000 fiit ama xarrunta daryeelka ilmaha.

XUQUUQAHAAGA KIREYSTE AHAAN

- Si gaar ah waxaad leedahay lahaanshaha guriga ilaa iyo heshiiska guriga uu ka dhacayo intiiba sharciga aad raacaysid. iyo heshiiska kirada/ijaarka oo aad la leedahay milkiilahaaga.
- Xuquuq aad ku wargelin karto hay'ad dowladda sida Dar-dargelinta Xeerka Degmada Columbus ee quseeya sharciyada iyo qaanuunyada guryaha la dego ee saameeya xeerka caafimaaadka iyo ammaanka (gefafka sharciga).
- Xuquuqda ku wargelinta milkiilahaaga marka milkiilaha ka soo bixi waayo waajibaadyada sharciga (ee kor ku qoran).
- Xuquuqda aad ku oggaanaysid magaca iyo cinwaanka milkiilaha (milkiilaha guriga) iyo wakiilkooda. Xogtan waa in heshiiska guriga ay ku qornaataa.
- Xuquuqda aad ku biiri karto kiraystayaasha kale si milkiilaha aad heshiiska guriga kula gorgortan
- Xuquuqda gaarka ah. In ogeysiis 24 saacaddood ah la siiyo si guriga loo galo.
- Qofka milkiilaha ma qaadan karo waxyaabaha adigu aad iska leedahay si uu ugu beddesho lacagta kirada ee adiga aadan weli bixin.
- Qofka milkiilaha dayactirku waa inuu ku sameeyaa 30 maalmood gudahooda ka dib marka qofka kiraysaha oo siiyo codsi guriga lagu dayactirrayo. Dayactirka saamayn ku yeellanaya ammaanka iyo caafimaaadka waa in si dhaqso ah loo sameeyaa oo waxaad dhici karta in si dhaqso ah wax looga qabtaa. Haddii dayactirka aad codsatay la qaban waayo waxaad xaq u leedahay in maxkamadda aad kala timaado amar ah in guriga la dayactirro.

MILKIILAHA

waa shaqsiga iska leh guriga la kiraystay.

KIREYSTAHA

waa shaqsiga meel uu deggo milkiilaha ka kiraysta.

MAAREEYAHA GURIGA

waa shaqgiga milkiilaha uu shaqaalaysiiyo si guriga uu u maareeyo.

LACAGTA DAMMAANADDA

waa lacag qofka kireystaha looga baahan yahay goorta guriga uu u soo guurayo si ay u daboosho wixii guriga dhexdiisa ka halaaba inta lagu jiro muddada qofka uu guriga deggan yahay. Lacagta dammaanadda waxay la mid tahay inta qofka uu bixiyo lacagta ijaarka ee uu bishiiba ama labadii bilba inta uu bixiyo ayay la mid tahay. Lacagta dammaanadda ah waa la soo celiyaa oo 30 maalmood gudahooda marka kiraystaha uu qabsado taariikhda guriga uu ka guurayo haddii aysan jirin qarashyo dheeraad ah. Qofka milkiilaha waa inuu lacagtii dammaanadda ahayd soo celiyaa (ama qofka kireystaha siiyaa warqad sharaxaysa halka loo isticmaalay lacagtii dammaanadda) oo 30 maalmood gudahood inta kireysaha uusan guurin la siiyaa. Milkiilaha lacag dammaanad ah wuxuu u isticmaali karaa inuu ku bixiyo lacagta kirada ee aan la bixin, lacagaha dallacaadda kale, ama wixii kiraystaha uu haleeyay ee ka baxsan waxyaabaha caadiga ee halaabay. Kiraystaha wuxuu u baahan yahay inuu milkiilaha siiyo cinwaankiisa/keeda si milkiilaha oo u oggaado halka qofka warqad ama lacagta dammaanadda loogu diro.

CAYMISKA KIRADA

waxay kiraystaha u caymisa hantida kireystaha haddii musiiibo ku timaado. Caymiska guryaha ijaarka badanaaba waxay dabooshaa waxyaabaha qiimaha kuu leh iyo qofka kiraysataha iyo sidoo kale guryaha inta gurigooda laga dayactirrayo ama ilaa iyo inta guri kale ay ka helayaan. Kiraystayaasha waa inuu shirkaddiisa caymiska ee iminka si uu uga wada hadlo caymiska ijaarka iyo waxyaabaha caymiska uu bixiyo.

WAX QOF LUGU AAMINO ILAA QOF KALE U FULIYO SHURUUD (XEERKA OHIO EE DIB-LOO HAGAAJIYEE EE 5321.07-10)

Qofka kireysataha lacag ayuu ka ceshan karaa qofka milkiilaha ah isaga oo markaas lacagta aaminaad ahaad maxkamadda ugu dhiibaya. Haddii milkiilaha uusan u hoggaansanayn heshiiska guriga iyo/ama sharciga, kireystaha marka koowaad wuxuu u baahan yahay in milkiilaha guriga siiyo ogeysiis qoraal ah ee dhibaataada oo milkiilaha meel uu dhigto nuqolka ogeysiiska qoraalka ah. Ogeysiiska waa inuu ku qornaadaa faahfaahin gaar ah ee sida milkiilaha ee uu xad gudub ugu sameeyey waajibaadyadiisa. Haddii dhibaataadii lagu xallin waayo 30 maalmood ka dib, qofka kiraysaha wuxuu samayn karaa (A) inuu heshiiska ka baxo ama (B) inuu bilaabo koontada eskuruuga uu ka bilaabaa Karaaniga Maxkamadda Degmada (375 South High Street, Dabaqa 3aad). Daaqadda maxkamadda ee qaybta eskuruuga ayaa ku siin kara lacagta milkiilahaaga aad ku leedahay oo sidaas ayaad ku sii wadaysaa inlaa dhibaataada laga xalliyo. Waa in aan halkan ku xusnaa in qofka kireystaha uu inta karaankiisa ah isku dayaa inuu si toos ah uu ula xiriiro oo uu ula hadlo qofka milkiilaha oo kala hadlaa dhibaataada ka hor inta lacagta kirada aan la dhigin koontada eskuruuga.

Sidoo kale qofka kiraystaha waa inuu tallaabada sharci uusan qaadin ka hor ka fikiraa qaab dhexdhexaadin ah lagu dhammeeyo. Mar marka qaarkood waxaa dhici karta in ay wax-tar leedahay haddii aad heli karto kiraystayaal kale oo isku xaalad aad tihiin oo si markaa koontada eskuruuga aad isku mar u samaysataan.

KONTORAADKA AMA HESHIISKA IJAARKA

Kontoraadka ama Heshiiska Ijaarka wuxuu noqon karaa heshiis af ah ama mid qoran oo adiga iyo milkiilahaaga u dhaxeeya. Waxaa ku qoran shuruudaha, shardiyaada, xeerarka iyo qaannuunada quseeya isticmaalka iyo ku jirista guriga. Heshiis si fiican loo qoray labada qolaba faa'iido ayuu u yahay oo waxa uu meesha ka saarayaa dhammaan wixii si wadajir ah aan loo fahamsannayn iyo wixii dhibaato ah ee ka yimaada milkiilayaasha iyo kiraystayaasha. Haddii aadan haysan heshiis qoran labada qolo midkooda toddobo maalmood gudahood ku bixin kara ogeysiis ka bixid heshiis. Milkiilaha looma oggola inuu iska wareejiyo mas'uuliyaddaha milkiilaha (sida ku sharaxan sharciga kor ku qoran) ee heshiiska kiraystaha waafaqsan. Si aad u hesho xog dheeraad ah muraajico ku samee Xeerka Ohio ee dib-loo hagaajiyay ee 5321.06.

DHEXDHEXAADIN BILAASH

Adeegyada Nabaddhelinta & Dhexdhexaadinta ee [Greater Hilltop Shalom Zone Mediation & Peacemaking Services]

(614) 276-6763 mediation@hilltopshalomzone.org

Adeegyada Dhexdhexaadinta Jaaliyadda ee Bartamaha Ohio [Community Mediation Services of Central Ohio]

(614) 228-7191 www.communitymediation.com

GURYAYNTA XAALADDAHA DEG-DEGGA [EMERGENCY HOUSING]

Hoyga Qoyska ee [YWCA Family Shelter] *Qoysaska kaliya* (614) 253-3910

Central Point of Access *Dadka qaangaarka ah ee Doobka kaliya* (888)

474-3587

HOY LA AWOODI KARO

Maamulka Guryaha Degmo waynta Columbus [Columbus Metropolitan Housing Authority] (614) 421-6000

Shabakada Guryaynta Jaaliyadda [Community Housing Network] (614)

487-6731

Guryaha Jaaliyadda ee Ohio [Community Properties of Ohio] (888) 437-0594

www.propertylist.cpoms.org

Meeleeyaha Guriyaynta ee Ohio [Ohio Housing Locator]

www.ohiohousinglocator.org

Homeport (614) 221-8889 www.homeportohio.org

Homes on the Hill CDC (614) 275-4663 www.hoth-cdc.org

XUQUUQDA GURYAHA & KALA-SOOCA

Haddii aad wajahayso kala-sooc dhanka guryaha la xiriir:

Ururka [The Columbus Urban League]

(614) 257-6300 or (614) 372-2345 www.cul.org/cul-housing-services/

Ururka Cadaaladda Guryaha ee Bartamaha Ohio [Central Ohio Fair Housing Association]

(614) 344-4663 www.cofha.com

Qadka-caawinaadda ee Guryaha Caddaaladda ee [NCLR Fair Housing

Helpline] (888) 532-3021 Guddiga Xuquuqda Dad-weynaha [Ohio Civil Rights

Commission] (614) 466-2785

CAAWINAAD DHANKA SHARCIGA

Ururka Kaalmada Sharciyeed ee Columbus [The Legal Aid Society of

Columbus]

GARGAARKA SAABAANTA GURYAHA [FURNISHING ASSISTANCE]

Salvation Army (614) 221-6561

Ururka Saabaanta ee Bartamaha Ohio [Furniture Bank of Central Ohio] (614) 272-9544

GARGAARKA DHAQAALAHAA EE XAALAD DEG-DEGGA [EMERGENCY FINANCIAL ASSISTANCE]

Waaxda Shaqada & Adeegyada Qoyska ee Ohio: Ka-hortagga Haynta, iyo ku Talaggalka [Prevention Retention, and Contingency (PRC)]

Ballan-qaadyada shaqaalaynta dadka qaangaarka ah ee haysta carruurta oo kaalmo ku meelgaar ah ama mushahar kab ah u baahan(614) 233-2000 xt 1

www.odjfsbenefits.ohio.gov *Saamaynta Tallaabada Jaaliyadda [Impact*

Community Action]

Bixinta kaalmada adeegga deg-degga ah ee ijaarka, biyaha/korontada; iyo saabaanka ee dadka deggan Deegaanka Franklin County oo aan carruurta haysan (ama haddii PRC loo diiday) (866) 747-1040 Salvation Army Kaalmo xaalad deg-degga ee dhanka ijaarka goorta la helayo (614) 221-6561

COMPASS

Kaalmada waa \$100 oo ijaarka loogu talagalay muddo 12-bilood (ogeysiiska guryo ka saarida ayaa shardi ah) (614) 221-6561

KAALMADA XADGUDUBKA QOYSKA

Dalabyada lagu Yareynayo Xadgudubka Qoyska

Kaalmada la bixiyo waa 24-saacaddood waa adeegyada xogta iyo dhibaataada, hoyga kumeel gaarka ah, la talinta, udoodida dhanka sharciga iyo jaaliyadda (614) 244-4663

ADEEGYADA LAANTA SOCDAALKA/FASALLO LUQADDA INGIRIISKA

Jaaliyadda Qaxootiga & Adeegyada Laanta Socdaalka

(614) 235-5747 Kuwa Barta af Ingiriiska ee Luqadaha Kale ku Hadla

(614) 456-1520

ILAHA JAALIYADDA EE GUUD

311 Dar-dargelinta Xeerka Columbus/Xarunta Adeegga Columbus


Si aad u codsado baaritaanno dhanka guryahaaga aad ku jirto ama si aad u soo sheegto gefaf dhanka sharciga (614) 645-3111 311.columbus.gov

Waaxda Caafimaadka ee Deegaanka Franklin County [Franklin County Health Department]

(614) 462-3160

Ururka [Hands on Central Ohio] (614) 221-2255 Ururka [The Ohio Benefit

Bank] (800) 648-1176



Qofka kiraystaha milkiilahooda waxay u diri karaan warqad ay ku qoran yihiin dayactirka loo baahan yahay in guriga laga sameeyo. Kiraystaha waa inuu milkiilaha u ogolaadaa wakhti macquul ah oo ku filan oo lagu dhammastiri karo wixii dayactir u baahan (taas oo ay ku xiran tahay sida daruuriga ee dayactirka loogu baahan yahay, 30 maalmood waa wakhti macquul ah oo la qaadan karo).

r

Magaca Kiraystaha
123 Cinwaanka Kireystaha Rd Apt 1
Columbus, Ohio 43223

Magaca Milkiilaha
123 Landlord Address Rd
Columbus, Ohio 43223

Bisha Maalinta, Sannadka

Gacaliye/so [Ku qor magaca milkiilaha],

Waxaan kuugu soo qorayaa in aan kaa codsado in aad qaado wixii tallaabo ah ee daruuri ah oo aad ku hagaajinnayso waxyaabaha gurigayga dhexdiisa ee u baahan in la hagaajijo:

- 1) Dhibaataada
- 2) Dhibaataada
- 3) Dhibaataada
- 4) Dhibaataada

Fadlan qaad wixii tallaabo daruuri ah oo aad wax uga qabannayso dhibaatooyinka waxaad haysataa 30 maalmood laga bilaabo taariikhda warqaddan ku qoran.

Aad ayaan kaaga mahad celineynaa feejignaanta aad siineyso arrinkan.

Daacadnimo,

Magaca Kiraystaha ku Saxiixan

Magaca Kiraystaha oo Daabacan

WAXAA MUHIIM AH:
Nuqul ka mid ah
warqadda adiga meel
dhigo oo reebo shahaado
caddaynaysa in warqad
aad u dirtay.



Haddii milkiilahaaga uusan ka soo jawaab celin warqaddii aad u dirtay ama aad siisay ee dayactirka aad ugu codsanaysay, oo adiguna wakhti macquul ah aad sugaysay jawaab ama dayactirkii in la dhammaystiro, waxaad go'aansan kartaa in heshiiska aad isaga baxdo. Arrinka marka sidan oo kale uu yahay warqad heshiiska aad ugu baxayso waa in milkiilahaaga aad u geysaa si aad uga guurto. (Tusaale warqaddo laga soo qaatay UrurkaLegal Aidka: *Milkiilahayga Guriga aan Deggannahay Wax Dayactir ah Ma Samaynayobaqshadda.*)

1

Magaca Kiraystaha
123 Address St Apt 5
Columbus, Ohio 43223

Magaca Milkiilaha
123 Address St
Columbus, Ohio
43223

Bisha Maalinta, Sannadka

Gacalivo/so Iku nor maacaa

Waxaan kuu soo qoray Bisha XX, 20XX aniga oo ku waydiisannaya in guriga aan deggannahay dayactir aad ku samayso. Markaa ka dib wakhti macquul ah ayaan ku sugay. Dhibaataadii waxba lagama qaban. Sidaa darteed, anigu waxaan qaadanayaa xuquuqda aan leeyahay oo i siinayo Xeerka Dib-loo hagaajiyey ee Ohio ee 5321.07(B)(3) oo ii oggolaanaya in heshiiska aan jebiyo. Guriga waxaan isaga bixi doonaa kama dambays habeen barka Bisha XX, 20XX. Furayaasha waxaan ku soo celin doonaa halka la dhigo oo lacagta kirada lagu rido.

Fadlan lacag dammaanad ah ee aad iga hayso ku soo dir cinwaankan:

Magaca Kiraystaha 123 Address St Columbus Ohio 43228

Aad ayaan kaaga mahad celineynaa feejignaanta aad siineyso arrinkan.

Daacadnimo,

Magaca Kiraystaha ku Saxiixan

Magaca Kiraystaha oo Daabacan

WAXAA MUHIIM AH:

Nuqul ka mid ah
warqadda adiga meel
dhigo oo reebo shahaado
caddaynaysa in warqad
aad u dirtay.

Booqo boggeena internetka ee ilaha
www.westsidelean.com si aad si sahlan uga soo
degsato oo warqaddahan oo kale kombiyuutar aad
u soo gashato.

Haddii qofka kireysataha uu heshiiska jebiyo ama lacagta ijaarka uu bixin waayo Milkiilaha qofka kiraystaha guriga ayuu wuxuu ugu geyn karaa warqad ogeysiis ah seddex maalmood gudahooda. Haddi kireystaha uu guriga isaga bixi waayo milkiilaha wuxuu soo qaadan karaa amar uu qofka kireystaha uu guriga kaga saarayo.

OGEYSIIS GURIGA LOOGA BAXAYO

(Waa Guryaha Dadka ay Deggaan oo Kaliya)

Ku socota: _____, Kiraystaha:

Fadlan ogsoonaw in qofka milkiilaha uu doonayo in guriga aad isaga baxdo maalinta ama inta ka horeyso

Aad isaga baxdo guriga aad deggan tahay oo aad kireysatay _____
_____ oo qaabkiisa iyo
iyo sifooyinkiisa uu yahay sida soo socota:

WAXAA MUHIIM AH:

Nuqul ka mid ah
warqadda adiga meel
dhigo oo reebo shahaado
caddaynaysa in warqad
aad u dirtay.

Ku yaallo Columbus, Degmada Franklin iyo Gobolka Ohio.

Sababbaha waa: __ (a) Lacagtii Ijaarka oo aadan Bixin Darteed _____

**WAXAA LAGU WAYDIISANNAYAA IN GURIGA AAD ISAGA BAXDO. HADDII AAD ISAGA BIXI
WAYDO, WAXAA LAGAAGA SAARI DOONAA IYADOO LAGUU CUSKANNAYO XEERKA GURRI
KA SAARIDDA. HADDII UU TUHUN KAAGA JIRO XUQUUQAHAAGA SHARCIGA IYO
WAAJIBAADYADAADA SIDA KIREYSTE AHAAN, WAXAA LAGULA TALINNAYAA IN AAD
RAADSATO KAALMO DHANKA SHARCIGA.**

_____, Milkiile

Taariikhda: _____

Cinwaanka Milkiilaha:



HESHIIS

HESHIIS IJAAR AMA HESHIIS GURYAHA LA DEGGO

Heshiiskan Ijaarka ama Heshiiskan Guryaha la Deggo wuxuu caddaynayaa shuruudaha iyo waajibaadyada heshiiska sida ay ku caddahay saxiixyada labada qoloba ay hoos ku saxiixeen oo ay isku raaceen. Milkiile/
Kireeye/Wakiil, _____, halkan waxaa lagu soo qaadnayaa sida "MILKIILE" iyo
Kirayste(yaal)/Ijaarte, _____, halkan waxaa lagu soo qaadnayaa sida "QOFKA GURIGA
DEGGAN." Sida
texgelinta heshiiskan, MILKIILAHA wuxuu waafaqsan yahay inuu guriga ka kireeyo/ka ijaaro QOFKA GURIGA DEGGAN
oo QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu waafaqsan yahay inuu ka kireyto/ijaarto MILKIILAHA si guriga uu u degnaado,
guriga ku yaalla _____ magaca degmada _____

1. SHURUUDAHA: QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu waafaqsan yahay inuu qadimo lacag gaaraysa \$ _____ bishii oo uu bixiyo
maalinta ee

bil kasta. Heshiiskan wuxuu shaqayn doonaa ilaa _____, _____ oo wuu sii socon doonaa; (mid calaamadee) A.

ilaa-iyoo _____, _____ heshiiska uu haysanayo. Markaas ka dib ijaarka guriga bil-bil ayuu noqon doonaa.

Haddii QOFKA GURIGA DEGGAN uu guriga isaga guuro ka hor inta aysan dhicin muddada, isaga ayaa masuul ka ah
lacagta ijaarka ee la iska rabo ilaa Qofka guriga deggan uu guriga degan yahay

MILKIILAHA uu ansaxiyay inuu QOFKA GURIGA DEGGAN uu bixiyo iyo/ama muddada uu dhacayo, kii yar. B. _____

ilaa-iyoo _____, _____ ijaar bil-ka-bil ilaa labada qof midkooda heshiiskan

isaga baxo isaga oo siinaya ogeysiis qoraal ah oo uu heshiiska uga baxayo ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta aan la
gaarin taariikhda heshiis ka baxida.

2. LACAGTA: Lacagta ijaarka iyo/ama lacagaha kale ee la soo dallacay waa in lagu bixiyaa qaabkii la isla gartay
ee milkiilaha sida soo socota _____ . Dhammaan wixii lacag ah oo dhan
waa in lagu bixiyaa jeeg ama lacagta [money order]ka oo lacag naqdi ahna waa la oggolaan karaa. MILKIILHA wuxuu qirayaa
inuu qaatay lacagta kirada ee Bisha Koowaad lacag dhan \$ _____, iyo Lacagta Dammaanadda oo dhan \$ _____,
iyo lacagaha dheeraadka ah/ujrooyinka _____, wadar ahaan lacag gaaraysa
\$ _____ . Dhammaan wixii lacag ah oo dhan waa in lagu bixiyaa _____

3. LACAGAHA DAMMAANADDA: Wadarta guud ee lacagaha la dhigay waa in ay ahaataa mid addeecsan
xaaladaha iyo shuruudaha heshiiskan oo waa in QOFKA GURIGA DEGGAN loogu soo celiyaa _____ maalmood
gudahooda

ka dib marka uu ka baxo guriga iyadoo MILKIILAHA uu ka jarayo wixii; a) lacag ijaar ah ee aan la bixin, b) qarashka
nadiifinta, c) qarashka beddelista furaha, d) qarashka dayactirka waxyaabihii guriga dhexdiisa halaabay iyo/ama
meelaha caamka ah ee la isticmaalay ee wax soo gaary, iyo e) wixii kale ee qarash ah ee uu dhigayo xeerka
heshiiskan. Lacagaha dallacaadda oo qoran waa in

loo soo bandhigaa QOFKA GURIGA DEGGAN _____ maalmood gudahood ee waqtiga guuritaanka. Haddii lacagta laga hormariyay
aysan daboolayn qarashyadan

- 4. DALLAACADA DAAHITAANKA:** Dallacaada daahitaanka oo dhan \$, (waa in aysan ka badnayn % kirada bisha), waa inay ahaataa lagu daray oo laga rabo wixii lacag ee kirada ahayd ee la bixiyo _____ bisha. Wixii lacag jeeg ah ee la soo celiyay waa in loo xisaabiyaa sida iyadoon ijaarka guriga aan la bixin, oo lagu soo dallaci karo lacaggo dheeraad ah oo gaaraya \$ _____ .
- 5. QARASHKA ISTICMAALKA BIYAHA, KORONTADA:** QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu waafaqsan yahay inuu bixiyo dhammaan isticmaalka qalabka iyo/ama adeegyada adeegyada guriga ee la deggo guiga aysan ka ahayn _____ .
- 6. KUWA KU JIRA:** Marti(yaasha) oo joogaya 15 maalmood in ka badan iyagoon ogolaansho aan MILKIILAHA ka haysan waxaa loo
- 7. XAYWAANKA GURIGA LAGU RABAAYADAYO:** Ma jiro wax xayawaan ah, malaay, dii-diin, iyo/ama cayayaan nooc kasta ah oo lagu kaydin karo meel u dhow meesha, wakhti kasta ha noqdo, iyadoon oggolaansho horey ah aan laga haysan qofka MILKIILAHA. Oggolaanshan noocan haddii la oggolaado, waa in ay noqotaa mid mid MILKIILAHA uu ka noqon karo isaga oo sii hor marinnaya ogeysiis qoraala h oo 30 maalmood ah. Haddii ay dhacdo in sharci la gudbiyo ama oggolaansho la ansaxiyo in xaywaanka guriga lagu rabaayadeysto iyo/ama xaywaan nooc kasta ah, lacago dheeraad ah oo la dhigto oo gaaraya \$ _____ waa in loo baahdaa taas oo ay weheliso lacagta kirada ee bil kasta oo gaaraysa \$ iyadoo ay weheliso Heshiiska Xaywaanka MILKIILAHA uu wato oo uu saxiixay. QOFKA GURIGA DEGGAN ayaa sidoo kale ku raacsan inuu sii la'haado caymisk ku haboon si MILKIILAHA uu isga bixiyo wixii dhib suurtoagal ah ee ka yimaada oo ay sababaan sida xaywaanadaan.
- 8. SAABYO DAREERE KA BUUXA:** Ma la qaadan doono saabaan biyo laga soo buuxiyay, ee qaada in ka badan toban gaaloon oo dareere ah ayaa la oggol yahay iyadoon loo baahan oggolaansho hore iyo kullaan heshiiska MILKIILAHA. Sidoo kale QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu ku raacsan yahay inuu haysto caymisk ku haboon MILKIILAHA si uu isaga bixiyo wixii lacag suurtoagal ah ee lagu soo dalaco ee ka dhex dhaca.
- 9. BARTA GAARIGA LA DHIGTO:** Goorta iyo haddii QOFKA GURIGA DEGGAN lagu qoro goob/meel baabuurka la dhigto ee sida gaarka ah loogu isticmaalayo in baabuurta la dhigto sida baabuurta rakaabka iyo/ama baabuurta la oggol yahay ee ku qoran Arjiga QOFKA GURIGA DEGGAN ee halkan ku lifaaqan. QOFKA GURIGA DEGGAN ayaa halkan lagu qoray ama loo oggol yahay inuu gaariga dhigto meesha loogu talagalay ama barta loogu talagalay kaliya _____ Lacagta dhigashada baabuurka ee goobtan (haddii ay jirto waa \$ _____ bishiiba. Meeshan la soo sheegay ma ahan in loo isticmaalo in wax lagu dhaqo, lagu rinjiyeeyo, ama baabuur lagu dayactirro. Ma jiri karo bar baabuurta la dhigto ee uu isticmaali karo QOFKA GURIGA DEGGAN ama martida(martada) QOFKA GURIGA DEGGAN. QOFKA GURIGA DEGGAN ayaa mas'uul ka ah wixii saliid ah ee soo daata iyo baabuurta kale ee wax ka soo da' kaa soo QOFKA GURIGA DEGGAN lagu dalaci doono inuu nadiifiyo haddii MILKIILAHA uu u arko inay daruuri tahay.
- 10. BUUQ:** QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu ku waafaqay inuu sababin ama uusan buuqa oggolaan ama dhaqdhaqyada guriga dhexdiisa ka dhaca kaa soo oo qalqal gelinnaya ammaanka iyo aamusnaanta QOFKA KALE ee GURIGA DEGGAN iyo/ama deriska kale. Buuqa iyo/ama dhaqdhaqaaqyada waa inay ahaataa heshiis jebis.

11. BURBURIN HANTADA: Haddii guriga ay qayb ahaan ama dhammaanteeda noqoto meel waxyeello la soo gaarsiiyay inta heshiiska uu socday oo QOFKA GURIGA DEGGAN uu waxyeello wayn guriga gaarsiiyay, MILKIILAHA ama QOFKA GURIGA DEGGAN si dhaqso ah ayuu isaga bixi karaa Heshiiskan ka dib marka uu siiyo ogeysiis seddex maalmoo dah.

12. XAALADDA GURIGA: QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu qirayaa inuu baaray guriga dhexdiisa oo guriga, wixii yaalay oo dhan, alaabta, saabaanta, tubbooyinka, kuleylaysida, qalabka korontada, iyo dhammaan wixii hanti ah ee ku lifaaqan liiska alaabta guriga ku jira, haddii ay jirto, iyo/ama dhammaan wixii alaab ah ee MILKIILAHA ay dhammaantooda yihiin kuwa nadiif ah, oo xaalad la aqbali karo yihiin aysan ka ahayn inta kuwa badankooda ku calaamadaysan meel kale oo Heshiiskan ku qoran. QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu waafaqsan yahay inuu guriga iyo waxyaabaha kale ee guriga yaala ka dhigo kuwa shaqaynaya oo xaalad wanaagsan ku jira oo wixii lagu yeeshana sida dhaqso ah u bixinnaya dhammaan wixii qarash ee dhanka dayactirka ah iyo/ama in la beddello wixii waxyeello ah ee soo gaara GURIGA LA DEGGAN YAHAY, martidiida iyo/ama dadka uu soo casuumay, aysan ka ahayn haddii sharciga uu ka reebay. Marka la gaaro jebinta Heshiiskan, dhammaan wixii qodobbo ah ee heshiiskan oo waa MILKIILAHA inuu ku soo celiyaa si nadiif ah oo xaalad la qaadan karo ah aysan ka ahayn waxyaabaha caadiga ee dhammaada oo halaaba oo guriga waa inuu ka maqnaadaa dhammaan wixii qofka kale isla leeyahay iyo wixii qashin ah ee MILKIILAHA aan iska la hayn mooyaane.

Waxaa lagu heshiiyay in dhammaan wixii wasaq ah, god ah, wixii halaabay, wixii gubtay, iyo dhibacyo ah ee soo gaartay ama caddaha katiifadda, daaha, derbiyada, saabaanta, iyo/ama ee qayb kale oo kasta oo guriga ka mid ah, ama dhigmo inay yihiin waxyeello macquul ah ee guriga soo gaaray.

13. WIXII WAX LAGA BEDDELLAY: QOFKA GURIGA DEGGAN ma ahan inuu guriga rinji mariyo, bacda derbiga ku dhejiyo, wax ka beddello ama dib u habeeyo, wax beddell ah u geysto ama quful ku dhejiyo, anteendo ku dhejiya ama qalab kale, musmaar, qalab wax dhuujiya, musmaarro wa wayn, ama walxo kale, calaamad ku dhejiyo, muujiyo, ama waxyaabo kale oo muuqaal ah, ama wax kale oo kasta iyadoon horey oggolaansho aan laga haysan MILKIILAHA guriga aysan ka ahayn haddii sharciga uu oggol yahay mooyaane.

14. DAYAC-TIRKA GURIGA: QOFKA GURIGA DEGGAN waa inuu dhigaa dhammaan lacagta qashin ururiska iyo wasaqda qaab nadiif ah oo nadaafadda ay ku jirto oo uu ku shubaa meel loogu talagalay oo meesha qashinka la dhigo ka dhigaa meel nadiif ah oo la qaadan karo. QOFKA GURIGA DEGGAN waa inuu mas'uul ka noqdaa dhammaan wixii qashin ah ee la daadinayo sida xajmiga iyo nooca qashin oo caadi ahaan aanu oggolayn kuwa qashinka ururiya. QOFKA GURIGA DEGGAN ayaa mas'uul ka ah inuu kushiinka iyo musqusha uu biyaha taslaya ka ilaaliyo kaas oo sababi karta inuu dhibaato guriga guriga ku keenno. QOFKA GURIGA DEGGAN waa inuu bixiyaa wixii lacag ah ee ku kaca nadiifinta tubbooyinka laga hagaajinnayo oo u baahan in lagu nadiifiyo oo lagu joojinnayo iyo wixii qarash ah ee ku baxa ama waxyeellada uu sababay joogsigii tubbada ay joogsatay ama biyaha ay ka soo daatay ama ka timid waaska qubeyska, barta qubeyska, ama barta alaabta lagu dhaqo.

15. XEERARKA GURIGA: QOFKA GURIGA DEGGAN waa inuu addeecaa dhammaan xeerarka guriga u degsan sidaku cad qoraalka goonida ah, laakin qayb ka ah heshiiskan kiraynata, oo waa wax gef ku ah xeerarka guriga u degsan oo waxaanna loo qaadan karaa inuu yahay mid heshiiskan jebinnaya

16. BEDELKA SHURUUDAHAN: Xaaladdaha iyo shuruudaha heshiiskan waa wax mustaqbalka uu wax ka beddelli kara MILKIILAHA ka dib marka ay dhacdo muddada heshiiska loo qabtay ka dib marka la bixiyo muddo 30-maalmood

Booqo boggeena internetka ee ilaha
www.westsidlean.com si aad si sahlan uga soo
 degsato oo warqaddahan oo kale kombiyuutar
 aad u soo gashato.

17. JOOJINTA: Ka dib marka ay dhacdo muddada loo qabtay oo heshiiska uu dhaco, heshiiskan si atomaatik ah ayuu wuxuu isku bed-beddellayaa bil-ka-bil, oo laakin labada qoloba midkooda ayaa ka tanaasuli karo isaga oo qolada kale siinaya dignaan qoraal oo 30-maalmood ah inuu guriga isaga baxayo. Halka sharciga uu saamaxayo "sabab la qaadan karo", sida marka ay dhacdo waa in ogeysiiska qoraalka lagu qoraa. Guriga waa in loo texgeliyaa in laga baxay ka dhib markii dhammaan guriga oo dhan oo uu ku jiro maqasiinka la firaqeeeyay oo QOFKA GURIGA DEGGANAA uu kala baxay wixii isaga/iyadu ay iska la'hayd, oo wixii furi ahaa iyo hantida kale ee QOFKA GURIGA DEGGAN la siiyay inuu isticmaalo uu MILKIILAHA guriga u soo celiyo. Haddii QOFKA GURIGA DEGGAN sii haysto ka dib marka la gaaro ama la dhaafo taariikhda ama uu ku guul-darreysto inuu isaga baxo uu sii qaato waxyaaba qofka iska leeyahay maalinta ama ka hor taariikhda guuritaanka ee loo qabtay, QOFKA GURIGA DEGGAN waa inuu mas'uul looga dhigaa wixii lacag kiro oo dheeraad ah iyo wixii waxyeello ah ee guriga soo gaara taas oo sababta fursad oo MILKIILAHA guriga ka dhinto inuu guriga ka kireeyo qof kale oo cusub.

18. MILKIYADDA: Haddii MILKIILAHA uu awooddi waayo inuu ballan-qaad ah ee QOFKA GURIGA DEGGAN uu la galo sida taariikhda ay ku heshiyeen, sababo dhibaato ama waxyeello guriga ku yimaada ama sababo ku aadan guul-darro oo qofkii hore guriga wakhtigii loo qabtay uga bixi waayo ama sababo kale, QOFKA GURIGA DEGGAN iyo/ama MILKIILAHA isla markiiba heshiiska guriga ayay ka tanaasuli karaan ka dib marka ogeysis qoraal ah ay ka sameeyaan oo ay gaarsiiyaan qolada kale oo ay ugu diraan caymiska ugu dambeeyay ee ay ka hayeen, oo markaas laba qofba ma jiraan mas'uuliyad lagu leeyahay, oo wixii lacag ah oo horey loo hormariyay dib qofka kale loogu soo celiyaa. Haddii labada qoloba midkooda heshiiska ka tanaasulaa, Heshiiskan waxaa lawada gaarsiiyaa oo laga soo bilaabayaa taariikhda guriga gacanta lagu soo dhigay.

19. CAYMISKA: QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu qirayaa in caymiska MILKIILAHA uusan daboolayn hanti qofeedka kale oo dhilaya sida dabka, xatooyo, roob, dagaal, amar Illaah, ficil qof kale uu sababay, iyo/ama sabab kale oo kasta, xitaa MILKIILAHA looma qabsan karo wixii qasaaro ah ee arrintan ka timaada. QOFKA GURIGA DEGGAN waxaa halkan lagula talinnayaa inuu yeesho caymiska guriga si uu u ceysado wixii qasaaro ah ee soo gaara.

20. XUUQDA GALITAANKA IYO BAARITAANKA: MILKIILAHA guriga wuu gali karaa, wuu baari karaa, oo/ama guriga dhexdiisa dayactir ayuu ka samayn karaa waqtikasta ee doono haddii ay dhacdo xaalad deg-degga ah ama ku tuhmo in guriga la daayacay. MILKIILAHA guriga waa inuu ogeysiis 24 saacadood bixiyaa oo sababta uu guriga u gali karo waxay noqon kartaa inuu guriga qof kale oo kiraysanaya tusanayo inta lagu jiro saacaddaha ganacsiga ee caadiga ah, qof kale oo iibsana kara, ammaahsan kara, kuwa baaraya digniin bixiyaha qiiqa, iyo/ama baaritaannada caadiga iyo dayactirka. MILKIILAHA waxaa loo oggol yahay in wixii beddel ah ee guriga u baahan oo dhan ay qaban karaa, wixii dayactir ah iyo wixii gacan ku hayn oo qofka MILKIILAHA uu u arko in ay daruuri tahay in guriga laga qabto.

21. HOWL: QOFKA GURIGA DEGGAN wuu waafaqsan yahay inuu guriga ku wareejin qof kale, u saxiixin ama qof labaad u siin guriga ama qof kale uusan ku wareejin.

22. QABIYO AAN SAX AHAYN: Ma jiri karto meel ka mid ah Heshiiskan in loo micneeyo inuu ka tanaasulayo qeyb kale oo ku qoran xuquqda MILKIILAHA uu leeyahay ama MILKIILAHA xuquqda uu leeyahay sida sharciga uu qabo. Haddii ay jiraan qayb Heshiiskan ka mid ah oo sharciga ka soo horjeeda, qaybtaas waa in laga talla baxaa ilaa inta ay qilaafsan tahay, laakin ma ahan in ay Heshiiskan aan sax ahayn oo mana ahan in ay saamayn ku yeellato sax ahaanshaha heshiiskan ama aysan dar-dargelinnayn qaybo kale oo Heshiiskan ka mid ah.

22. TANAASULAAD MA JIRO: Oggolaanshaha MILKIILAHA ee kirada iyadoo la qirayo wixii qaladaad ah ee QOFKA GURIGA DEGGAN dhankiisa ah ama MILKIILAHA ee qayb kasta oo Heshiiskan ka mid ah ma ahan inay ka dhigan tahay mid loogu tanaasulayaa wixii kale ee sharci ah ee heshiiska ku cad. Haddii qofka uu ku guul-darreysato inuu u

- 23. UJRADA QAREENKA:** Haddii labada qof midkooda uu qaado tallaabo dhanka sharciga ah ama dhegeysi maxkamad uu mid qaado oo Heshiiskan quseeya, qolada guulaysata waa in loo soo celiyaa dhammaan wixii qarash ah ee qarashka qareenka iyo wixii lacag ah ee uga baxay taas oo ay dheer tahay wixii waxyeello ah ee soo gaaray ee loo abaal-mariyo.
- 24. WADAJIR IYO KALA SOOCAN:** QOFKA GURIGA DEGGAN ee hoos ku saxiixan ayaa si wadajir ah iyo si kala soocan masuul uga ah oo loo qaban karaa dhammaan wixii waajibaad ah ee heshiiskan hoos yimaada.
- 25. KU WARGELI HAY'ADDAHA KAREEDITKA/KIREYSTAHA:** Halkan waxaa lagu ogeysiisay in ay jirto lacag aadan bixin, mid soo raagtay ama arrin heshiiska ijaarka guriga jebisay oo waxaa dhici karta in lagu wargeliyo hay'adda warbixinta kareeditka iyo/ama hay'adda kireystaha, oo waxaa dhici karta in ay kuu keento oo diiwaangelintaada ay kuu geliso sumcad xumo oo dhanka kareeditka ah.
- 26. SHURUUDA KU WARGELINTA RINJIGA [LEAD]:** Guryaha la kireeyo ee la dhisay ka hor inta aan la gaarin sannadkii 1978, QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu qirayaa inuu helay kuwa soo socdo: (Fadlan calaamaddee) _____ Daah ka Qaadiska Rinjiga Leadka Foomka __Hay'adda Ilaalada Bay'adda ama Deegaanka
- 27. WIXII DHEERI AH IYO/AMA WIXII KA BAXSAN** _____
- 28. OGEYSIIS:** Dhammaan wixii ogeysiis ah oo ku socda QOFKA GURIGA DEGGAN waa in loogu geeyaa guriga QOFKA GURIGA DEGGAN iyo in dhammaan wixii ogeysiis ah oo MILKIILAHA ku socda waa in loogu geeyaa _____
- 29. SAABTA GURIGA TAAL:** Saabta guriga taal ayaa ku jirta qaybta qaybta ee QOFKA GURIGA DEGGAN laga xaqiijiyay inta marka _____
- 30. FURAHA IYO WAXYAABAHA GURIGA LA ISTICMAALO:** QOFKA GURIGA DEGGAN wuxuu qirayaa inuu helay kuwa soo socdo ku waasoo loo arko in Heshiiskan ay qayb ka yihiin: (Fadlan calaamaddee) _____ Furayaasha inta furi iyo sababta furaha _____
_____ Xeerarka Guriga __ Heshiiska Xaywaanka Guriga _____ Waxyaabo Kale _____
- 31. HESHIISKA OO DHAN:** Heshiiskan waxay qeyb ka tahay Heshiiska oo dhan oo u dhaxeeya MILKIILAHA iyo QOFKA GURIGA DEGGAN. Ma jiro heshiis afka ah ee la isla galay, oo dhammaan wixii dib u habbayn ah ama ogeysiisyo kale noqotaa mid qoraal ah si uu u jiro.
- 32. HELISTA HESHIISKA:** QOFKA GURIGA DEGGAN ee hoos ku saxiixan wuu akhriyay oo wuuna fahmay Heshiiskan oo halkan wuxuu ku qirayaa inuu helay nuqdi ka mid ah Heshiiskan Ijaarka ah.

Saxiixa Qofka Guriga DEGGAN _____ Tariikhda.

Saxiixa Qofka Guriga DEGGAN _____ Tariikhda.

Saxiixa MILKIILAHA ama Wakiilka _____ Taariikhda.

www.WestsideLEAN.com

Ma guryo ijaar ah ayaad ka raadinnaysaa dhanka Westside?

Si aad ula xiriirto milkiilayaasha LEAN oo ku saabsan guryaha ay hayaan booqo Boggeena internetka qeybtiisa "Koro Ah" ["For Rent"]. Milkiilayaasha LEAN waxay xubin ka yihiin LEAN oo waxay ku yaboohaya maareeynta guriga oo ay mas'uuliyad ku jirto. Si toos ah ayaad kala xiriiri kartaa wixii guryo kiro ah ee ay hayaan.



Homes

on the H

Iskaashiga Horumarrinta Jaaliyadda



Ku saabsan Homes on the Hill Iskaashiga Horumarrinta Jaaliyadda Wixii Xog oo Dheeraad ah la xiriir:

Homes on the Hill waa urur 501(c)(3) oo waa urur sama-fal ee dhanka guryaha la dego ah iyo hay'adda la talinta guryaynta ee HUD uu ansaxiyay. HOTH qoysaska wuxuu ka caawinnayaa inay gaaraan riyadooda guryo iibsi iyo guryo haysasho iyadoo loo marinnayo fasalladeena waxbarasho iyo la talinta hoyga oo shaqsiyaadka loo fidinnayo. HOTH waxay ka shaqaysaa iyadoo qabaab kala duwan iyo karti ay u siiso jaaliyaddaha taas oo ay ku jirto hirgelinta barnaamijka LEAN.

Homes on the Hill waxay fidiyaan guryo iib ah oo ay ugu talagashay qoysaska iyo shaqsiyaadka dakhligoodu uu hooseeyo iyo kuwa dakhligoodu uu dhexdhexaadka yahay, fasallo waxbarasho ee dadka marka ugu horeysay guryaha iibsannaya, la talin dhanka miisaaniyadda iyo sumcadda [credit] ka, la talinta ka hortagga dhanka guryo kala wareegida, iyo la talinta dhanka kirraynta. Adeegyada oo dhan waxaa lagu bixiyaa luqadda Ingiriisika iyo Isbaanishka.

Homes on the Hill CDC

3659 Soldano Boulevard Columbus, OH 43228
telfoon (614) 275-HOME (4663) fakis (614)
275-3060 development@hoth-cdc.org

www.hoth-cdc.org

Tilmaantan Ilaha waxaa loo soo diyaariyay si aad uga hesho xog guud oo ku saabsan xuquuqda/mas'uuliyaddaha kiraystayaasha iyo milkiilayaasha iyo in lagu caddeeyo arrimaha kirraynta iyo sharaxaadda. Xogta ku qoran buug-yarahan waxaa laga soo ururiyay ilaha hoos ku qoran iyo Xeerka Dib-loo hagaajiyey ee Ohio [Ohio Revised Code]. Wixii talo ah ee ku saabsan arrin gaar ah ee dhanka sharciga kala hadal qof qareen ah. Xogta halkan ku qoran waxaa idin soo gudbiyay Tilmaanta Ilahan waxaa lagugu soo diyaariyay si adeeg dad-weyne oo in aad xog ka hesho oo kaliya ayaa loogu talagalay. Oo ma ahan talo dhanka

Ururka Kaalmada Sharciyeed ee Columbus [The Legal Aid Society of Columbus]

Xuquuqda iyo Waajibaadyada Kiraystayaasha ee Deegaanka Franklin County

Columbus, 2014. Daabac:

18

Ururka Kaalmada Sharciyeed ee Columbus & Adeegyada Dhexdhexaadinta Jaaliyadda

Milkiilaha Guriga aan Deggannahay Wax Dayactir ah Ma Samaynayo: Maxaan Sameyn karaa?

Columbus, 2014. Daabac:

Ururka Qareennada Gobolka Ohio

Waxay tahay in aad ka ogaato Waxyaabaha ku Saabsan Xuquuqda iyo Mas'uuliyaddaha Kiraystaha/Milkiilaha. Columbus, 2013.

1

• **Shabakada Tallaabada ka Qeybgelinta Milkiilaha**

MACLUUMAADKA ARJI-QORTA

Magaca: _____

Magaca Ganacsiga:

Cinwaanka:

Degmada:

Gobolka:

Sumada Boosta (Zip Code):

Emailka:

Telfoon:

BALLAN-QAADKA LEAN



O Kiraystayaasha waxay u fidinnaysaa hoy ammaan ah, qalayl ah, nadiif ah, guryo hufan.

O Sharciyan ka soo baxaya waajibaadyada milkiilenimada.

O Guryaha kirada ah qaab la oggolaan karo u soo bandhiggaya.

O Ka qaybqaadanaya adeegyada dhexdhexaadinta oo nabad ku jirto si qilaafaadka loo xalliyo.

O Oo aan qayb ka ahayn dhaqanka daroogada, dembiyada, ama rabshadaha.

O Guryaha kiradaha ka diiwaangeliyo Xisaab hubiyaha Deegaanka Franklin County.

SAXIIXA

1 ansaxi caddaymaha xogta foormkan ku qoran oo ku raac in aad dhowrayso ballan qaadka LEAN.



Saxiixa:

v_____

Taariikhda:

LEAN waa shabakad ay ku middaysan yihiin milkiilayaasha, kiraystayaasha, iyo derisyada Columbus Westside ku waas oo ka wada shaqeeya si loo wanaajin la'haa jaaliyadda kiraystayaasha iyagoo loo marinnaya waxbarashada, isku xirka, iyo xallinta.

